

Muxuu yahay Barnaamijka Taageerada Daryeelka Qofku?

Waa barnaamij gargaara dadka naafoda ah ee ku nool bulshada.

Muxuu qabtaa Kaaliyaha Daryeelka Qofku (PCA)?

Iyada oo ku xidhan baahida qofka sida ku qeexan qiimaynta adeegyada PCA, PCAs waxay ka gargaari karaan dhawr waxyaabood oo kala duwan. PCAs waxay ka gargaari karaa waxqabadka maalin nololeedka sida cunista, qubayska iyo dhar-xidhashada. Waxay ka gargaari karaan waxqabadyada taageera nolo maalmeedka sida qorshaha cuntada, maamulka lacagta iyo ka-qaybqaadashada waxqabadyada bulshada dhexdeeda. PCAs waxa kale oo ay ka gargaari karaan baahida la xidhiidha caafimaadka sida dawo qaadashada iyo arrimaha hab-dhaqanka.

Ayaa u qalma Barnaamijka PCA?

Si aad u hesho adeegyada PCA ee gobolku maalgeliyo, waa in la buuxiyo saddex shardi oo u-qalmanaan ah:

1. Inaad u-qalanto ama qaadato Taageerada Caafimaadka “Medical Assistance”.
2. In ay jiraan amar Takhtar oo sheegaya in adeegyada PCA ay caafimaad ahaan lagama maarmaan yihiin.
3. Inay jiraan cid mas’uul ah oo samayn kara go’aanada la xiriira daryeelka iyo ka warhaynta adeegyada PCA. Qofkaasi wuxu noqon karaa qofka helaya adeegyada PCA haddii uu awoodo samaynta go’aanada daruuriga ah oo ka warhayn karo daryeelkiisa.

Caruurta, adeegyada PCA waxay ku salaysan yihiin baahida ilmo qaba naafo oo ka weyn oo ka badan wax uu waalidka ama daryeeluhu sida caadiga siin karo ilmaha naafoda ah.

Sideen u heli karaa adeegyada PCA?

- Tallaabada ugu horraysa la xiriir degmada uu qofku ku nool yahay oo codso Qiimaynta PCA.
- Qiimaynta PCA waxa dhammeeya Kalkaaliyayaasha Caafimaadka Dadweynaha oo ay kormeeraan kalkaaliyayaal xirfad dheeraad ah leh.
- Qiimaynta PCA waxa ku jira dib-u-hubin iyo qiimaynta baahida adeegyada uu qofku dhammeeyey.
- Qiimaynta PCA waa inay dhacdo 30 maalmood gudahood kadib markaad codsato adeega.
- Qiimaynta waxy fiirisaa waxyaabaha uu qofku u baahan yahay ee wakhti ahaan (1 xubin waa 15 daqiiqo) ay baahan yihiin wax walba in lagu qabto.
- Q adarka adeega waxa lagu saleeyaa natiijada qiimaynta.
- Qiimayntu waxa la sameeyaa hal mar sannadkii markaad aad bilowdo helitaanka adeegyada PCA, laakiin waxa la codsan kara in ka badan haddii baahida qofku isbedesho.

Maxaa dhaca What happens after a PCA assessment?

- Degmada ayaa u dirta gobolka qiimaynta, oo haysta 30 maalmood oo ay ku hubiyaan Qiimaynta.
- Gobolka ayaa amraya adeegyada.
- Qorshaha adeegyada PCA ayaa la kobcinayaa.
- Tiro wakaalado ah ayaa bixiya adeegyada PCA; degmada ayaa bixisa liiska bixiyayaasha adeega aad ka dooranayso.
- PCA Choice Option waa si kale oo aad ku heli karto adeegyada PCA. Ikhtiyaarka, adeeg heluhu wuxu mas’uul ka yahay qorashada, tababarka iyo cayrinta shaqaalaha halkii wakaalada.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.